Imtixaanada (delprøvene) waxaa darajooyinka lagu gaadhaya in uu macalinku tiriyo oo qoro inta laylis ee ardaygu si sax ah u gartay. Isla laylika (deloppgave) waxaa laylis-hoosaadyadiisa loo xisaabinayaa si isku mid ah. Laakiin waa in uu macalinku ogaadaa in laylisyada (deloppgavene) ay ardaydu qorayaan xarfka ugu horreeya iyo kan ugu danbeeya iyo waliba laylisyada eray-akhrinta in qaar kamid ah isla laylisyadu ay sii adkaanayaan marba marka kadanbaysa. Shaxda (tabellen) soo socota ayaa macalinku ka arki karaa sida ardayda ka qaybqaadatay tijaabintu ay u gaadheen (xagga darajada) imtixaannadan (delprøvene). Waxaa la bixiyay qiimayaasha celceliks ah. Waxaa la xisaabiyay masaafadda-gaadhitaanka darajada oo laga xisaabiyay celceliska lagu magacaabo kaduwanaanta sida caadikga ah (standardavvik). Ardayda ka qaybqaadatay tijaabinta badidoodu waxay ku sugan yihiin gudaha masaafaddaas marka laga eego dhinaca celcelicka. Laakiin in kayar 20% waxay soo gaadhaan meel kahoosaysa xuduuddan. Waxay u muuqataa inay jirto sabab loogu sii fiirsado ardayda gaadhay darajo ka hoosaysa heerka loogu talo galay (avstandssmålet). Sidaa daraadeed waxaa la isticmaalayaa si kahoosaysa xuduudda. Laakin tani maaha xuduud iskusi laga wada dhigay. Waa in yar oo arday ah marka labarbardhigo isku si kawada dhigista (standardisering) ardaydaasina maaha qaar si lama filaana loosoo doortay. Waa in sidaa daraadeed xuduudaha loo arkaa inay yihiin kuwo tilmaan bixin ah oo kumeel gaadhna ah. Waxaa wali marar badan lasoo ururinayaa natiijooyin si natiijooyinku u noqdaan qaar aad loo hubo.

Jawaabta saxda ah ee yeedhiska xarfaha iyo laylisyada eray-akhrinta

Waxaa loo sameeyay meel laga eego jawaabaha saxda ah ee laylisyada (deloppgavene) yeedhiska xarfaha iyo labada laylis ee eray-akhrinta ee fasalka 2aad. Kuwani waxay ku yaalliin cutubka halka ugu danbaysa. Yeedhiska alifbeetada

xarafka saxda ah waa la muujiyay. Way fiican tahay in la midabeeyo xarfaha saxda ah waayo si dhakhso ah ayaa loo sixi karaa. Layliska eray-akhrinta isagana jawaabta saxda ah waa la muujiyay. Erayada oo af-noorwiiji ku turjumani waxay ku hoos yaalliin erayada layliska (oppgaveordene).

Marka ardaydu qorayaan xarafka ugu horreeya iyo kan ugu danbeeya ama ay isku xidhayaan xarfahaba markaa erayada saxda ahi iyagaa is muujinaya oo iska soo muujinaya tilmaanta. Laakiin muuqaalka guud ee laylisyada “qorista xarafka ugu horreeya iyo kan ugu danbeeya” wuxuu ku yaallaa xagga danbe ee cutubka (kapitlet) si macallinku uu meel ugu haysan karo muuqaalkaas guud. Xarfaha sida maqluubka (speilvendt) ah u qoran waxaa la xisaabiyay inay khalad yihiin inkastoo ay caadi tahay in carruurtu ay xarfaha maqluub u qoraan milawga hore. Xarfaha aan saxda ahayn laakiin muujinaya in ardaydu ay yihiin kuwo maqalkooda dhawaaqa luqadu uu fiican yahay waxaa iyana halkan la xisaabiyay inay khalad yihiin. Tani waa yara cadaalad-darro waxaanay si gaar ah ugu dhacaysaa ardayda wax ku qora af-fiyatnaamiga iyo urduuga. Waxaa taas lagusii sharxay qaybtan soo socda iyo laylis (delprøve) kastaba.

Imtixaanadu (delprøvene) isku si uguma adka luqadaha oo dhan

Ogow in ay kala duwan tahay habka gaadhista darajada ee luqad kataaba. Taasina waxay sida ay u badan tahay ku timi kala duwanaanshaha hababka qorista. Laakiin la iskama indha tiri karo in ay kaloo ku tacaluqdo(laxidhiidho) inta saacadood ee ardayda loo siiyo waxbarasho qorista iyo akhriska ah, nooca waxbarsho ee ay helaan iyo fursada ay waalidku u leeyihiin inay taageeraan oo ka caawiyaan barashada akhriska. Si aan gaadhista darajooyinka ee ardayda si khaldan loogu fahmin waxaa muhiim ah in la ogaado sida habka qoristu (skriftsystemet) uu u raadaynayo sida ay ardaydu wax u akhriyayaan oo wax u qorayaan bilawga.

Qoraalada saafiga (waadix) ah iyo kuwa aan saafiga (waadix) ahayn (gjennomsiktige og ugjennomsiktige ortografier)

Qaar kamid ah hababka qoraallada waxaa jira xidhiidh toos ah oo ka dhexeeya xarafka iyo dhawaaqiisa¹⁷ ku xidhiidhsan xarafkaas. Waxaa tusaale fiican oo ah qoraal saafi ah inoo noqon kara af-turkiga. Hal xaraf ayaa inta badan loo akhriyayaa hal hab oo qudha. Tusaale xarafka ‘c’¹⁸. Af-turkiga xarafkan waxaa loo akhriyaa(loogu dhawaaqaa) isku si uun erayga ay doontaba haku jirtee. Mana jiro xaraf kale oo dhawaaq ahaan lala xidhiidhin karo af-turkiga dhawaaqa uu leeyahay ‘c’¹⁹ Laakiin af-noorwii jig wuu ka duwan yahay markaynu eegno ‘c’. Waxaa loogu dhawaaqi karaa sida ‘s’ markuu ku jiro magaca Cecilie ama sida ‘k’ markuu ku jiro magaca Carl. Ardaygu markaa wuxuu af-noorwii jiga qorayaa dhawaaqa ‘k’ isaga oon ogayn xarafka saxda ahi ka uu yahay, markaas oo uu kala dooran karo xarfaha ‘k’ iyo ‘c’. Sidaa

¹⁷ Si aan u muujinno dhawaaqa af-noorwii jiga waxaa la isku dayi karaa in lagu dhawaaqo magaca xarafka iyadoon lagu dhawaaqin shaqalka magacaas. Ku dhawaaqista xarafka ‘p’ wuxuu noqonayaa sida ‘pø’ oo kale oo loogu dhawaaqay shaqal gaaban ahaan.

¹⁸ Tilmaantan xarfaha, erayada iyo weedhahaba waxaa lagu qoraa badhtamaha calaamadahan ‘ ’marka iyaga laga hadlayo. Waana caadi marka lagu jiro cilmibaadhista luqadaha. Waxaa laga yaabaa inay u muuqato wax lagu dawakho marka lagu sameeyo xarfaha af-fiyadnaamiga waayo waxaa la isticmaalaa qoraalka af-fiyadnaamiga calaamado dheeraad ah oo shaqalladu leeyihiin iyo qaar ay leeyihiin habka dhawaaqistu. Doodda imtixaanka(delprøven) ee Yeedhiska xarfaha waxaa la isticmaalayaa xarfaha waawayn marka laga hadlayo xarfo, waayo waa tan ta lagu isticmaalayo layliskan(delprøven). Marka erayada af-noorwii jiga ahi ku dhex jiraan qaws lama isticmaalo calaamado waayo kani waa eray iyo inaan si aan si khaldan loogu fahmin. Erayada af-urduuga iyo xarfihiisuba ma calaamadsana qormadan af-noorwii jiga ah waayo waxay umuuqanaysaa wax lagu dawakho

¹⁹ Waxay isku dhawaaq yihiin magaca af-ingiriisiga ee George

daraadeed af-turkigu wuu ka fudud yahay, taas oo aan odhayno wuu ka saafisan yahay (waadixsan yahay) af-noorwiiijiga.

Ardayda wax ku qoraysa af-fiyadnaamiguna way leeyihiin taas ah uhaysashada laba xaraf ee dhawaaqa k-da. Xaaladan oo kale maaha mid saafi(toos) ah sida af-turkiga oo kale. Taa macdnaheedu waa in si fudud bilawga khalad loo qori karo, yacni kahor intii erayga marar badan la akhriyay ee lala qabsaday(labartay). Luqad laxisaabiyo inay tahay mid aan saafi(waadix) ahayn oo sidaa daraadeedna ay ku dhawaaqisteedu ku adagtahay ardayda baranaya akhriska iyo qoristu waa af-ingiriisiga. Farqiga u dhexeeya af-ingiriisiga iyo af-jarmalka ee dadka bilawga ah ayaa daraasad lagu sameeyay. Ardayda ku hadasha af-ingiriisiga ayaa khalad-akhrintoodu ka badan tahay kuwa af-jarmalka ku hadla. Urduuga laftiisu maaha mid waadix ah (yacni aan xarafku dhawaaq kale lahayn) waayo tusaale ahaan M woowga (vav) waxaa loo akhriyi karaa sida xarfaha *af-noorwiiijiga ee 'v', 'o' ama 'å', halka ya'da fl (choti-je) looga akhriyo sida 'j', 'i' ama 'e'. Taa waxaa dheer waliba in loo qori karo dhowr nooc xarfaha u dhigma kuwa dhawaaqa af-noorwiiijiga ee 'z-', 's-' iyo 't-'. Sababta shaqallada gaaban ee erayada aan loogu qorayn af-urduugu waxay tahay in eray qoran uu leeyahay siyaalo badan oo loo akhriyi karo. Af-urduuga waa in qofku inta badan uu fahmo weedhaha eraygu ku jiro si uu u fahmo eraygaasi kuu yahay.

Af-albaaniga iyo af-turkigu waa luqado qoraallo waadix (yacni aan xarafku dhawaaq kale lahayn ee hal dhawaaq leeyahay) ah leh oo xataa xarfahooda lammaanaha ah ee 'xh' iyo 'gj' ee albaanida Kosofo waxay u muuqdaan inay kuwaas isku dhawaaq yihiin. Af-fiyadnaamigu isagu aad waadix (yacni aan xarafku dhawaaq kale lahayn) uma aha. Xarfo door ah ayaa lagu xidhiidhin karaa hal nooc oo dhawaaq ah mana aha oo qudha 'k' iyo 'c' ee waliba 'i' iyo 'y'. Taa waxaa sii dheer in af-fiyadnaamigu leeyahay wax lagu magacaabo ku dhawaaqista labanlaabanta (dobbel artikulasjon). Macnuhu waa in tusaale ahaan xarfka 'c' marka uu ugu danbeeyo eray wata shaqallo cayiman loogu dhawaaqayo sida 'k' iyo 'p'²⁰ oo la isku daray. Waxaaba la odhan karaa marka dhinac laga eego xarfka 'c' wuxuu kaloo halkan matalayaa dhawaaqa 'p' kasakow dhawaaqa 'k'.

Af-somaaligu isaga marka kuwa kale loo eego waa waadix (yacnia aan xarafku dhawaaq kale lahayn ee hal dhawaaq leeyahay), laakiin macalimiintu af-soomaaliga waxay ogaan karaan in shaqal-kastaaba matalayo dhawaaqyo loo fahmi karo inay yihiin laba shaqal oo kala duwan. In badan oo af-soomaaliga ku hadasha iyo noorwiiijiga af-noorwiiiji oo qudha ku hadlaa waxay dhawaaqa 'oo' ee erayga 'maroodi' ugu muuqanayaan sida dhawaaqa af-noorwiiijiga ee 'ø' halka dhawaaqa 'oo' ee erayga 'roob' uu aad ugu eeg yahay dhawaaqa af-noorwiiijiga ee 'å'.

Heerka kalmadaha (erayada) ee ardayga (Elevenes ordforråd)

Imtixaanada waxaa hore loogu tijaabiyay arday badan kahor tijaabintii gu'gii 2000 iyo 2001. Waxaa sidaa loo sameeyay si loo hubiyo in ardaydu garanayaan erayada. Qaar badan oo ka mid ah erayada lagu isticmaalayo laylisyada eray-akhrinta waxaa kaloo lagu isticmaalay yeedhiska erayada iyo imtixaanada ay ardaydu qorayaan xarfka ugu horreeya iyo kan ugu danbeeya ee hal eray. Waxaa kaloo sidaa loo sameeyay in la hubiyo in erayada la garto (barto). Laakiin maadaama ay ardaydu ku sugan yihiin xaalad ay yihiin kuwo luqad ahaan laga tiro badan yahay way adag tahay in la hubiyo in ardayda oo dhami xaqiiqdii garanayaan erayada ku jira imtixaanada. Haddii aanay ardaydu garanayn erayada waxay imtixaanadu soo koobayaan (ururinayaan) heerka kalmadaha in kabadan kartidooda-akhriska *(Dersom elevene ikke kjenner ordene, kartlegger disse prøvene i større grad ordforråd enn leseferdighet). Waxaad kaloo

²⁰ Olav Husby (1991) ayaa tan wax kaga qoray garaamarkiisa af-fiyadnaamiga.

eegtaa faallooyinka ku yaalla tilmaanta imtixaannada fasalka saddexaad ee ku saabsan lahjadhaha iyo luqadda caadiga ah.

Dysleksi (adkaanta akhriska iyo qorista) iyo dhibaatooyin khaas ah (gaar ah)

Imtixaannada waxaa loo sameeyay si ardayda ay mushkiladdu ka haysato akhriska iyo qorista loo heli karo (loo garto) oo ay wakhti hore caawimo u helaan. Hal nooc oo ka mid ah mushkiladaha akhriska iyo qorista waxaa lagu magacaabaa dysleksi (adkaanta akhriska iyo qorista). Waxa horta dysleksi (adkaanta akhriska iyo qorista) yahay iyo ardayda ay yihiin kuwa ay haysato mushkiladani wali way ka doodaan cilmi-baadhayaasha iyo dadka takhasuska lehi. Laakiin waxaa maanta aad la isugu raacsan yahay in mushkiladan akhriska iyo qorista ee haysata arday badan inay ku saabsan tahay in ay mushkiladi ka haysato in kamid ah inaha ugu yar yar ee luqadda²¹.

Waxaana laga hadlayaa in ay mushkiladi ka jirto fahanka dhawaaqa-luqadeed iyo xaalad la xidhiidha dhawaaqyadan-luqadeed. Laakiin waxaa kaloo laga hadlayaa mushkilado ay lasocdaan habab-warbixineed guud iyo mushkilado ka jira wax ka qabashada (ka shaqaynta) aragtida maskaxda. In ay jirto mushkilad ah qoraalka iyo akhriska oo sababteedu tahay xaalad la xidhiidha habka samayska ee maskaxda oo mushkiladaasina tahay mid la iska dhaxli karo iyaduna waa mid si culus la isugu raacsan yahay. Qaar kamid ah dadka takhasuska leh waxay ka hadlayaan mushkilad akhriska iyo qorista ah oo khaas ah. Erayga 'khaas' (spesifikke) waxaa loo isticmaalay si loo kala saaro arrinta ah in ay mushkiladi ka jirto akhriska iyo qorista oo sababta mushkiladaasina tahay mid la xidhiidha xagga samayska qofka iyo isbarbardhigista mushkilado ay waxyaalo kale u sabab yihiin.

Caadi ayay noqotay in lagaga hadlo dysleksi (adkaanta akhriska iyo qorista) meesha aanay ardayda haysan mushkilado dheeraad ahi. Laakiin xadidista noocan oo kale ah waxaa maanta ka dooda dadka takhasuska u leh. Baaxadda dhibaatooyinka iyo sida ay ugu dhacdo ardaygu maaha mid kulligood isku si ugu dhacda. Laakiin ta ugu muhiimsani waa in faa'iido laga gaadhayo in wax loo qabto ardayda ugu badan ee dhibaataadu ka haysato akhriska iyo qorista. Ka akhri qormooyinka ka hadlaya wax yaalaha la qaban karo cinwaanka Hawlgal (tiltak).

**Dysleksi (adkaanta akhriska iyo qorista) - fonologiske vansker (adkaanta dhawaaqyada luqadeed, ordavkodingsvansker(eray-akhrin) iyo mushkilado ay qayb ahaani ku jirto isbedelka-qorista*

Waa caadi in loo arko akhriska iyo qorista kuwo isbedello mara. Marka ugu horraysa waa isbedelka horumarinta. Carruur badan ayaa hore u barata waxyaalaha ay qoraalada, buugaagta iyo qormooyinku ay ka warramayaan. Muddo kaddibna waxa kale oo ay carruur badani bartaan macnaha calaamadaha qoraalka. Mar labaadkana waxaa lagu xisaabtamayaa in marka qof wax akhriyayo ay waxa isla wakhtigaas dhacayaa yihiin isbadal qasan/fahnkiisu adag yahay (komplisert). Isbadalkani wuxuu bilaabmayaa isla marka ay ishu aragto qoraalka iyadoo joogaysa ilaa erayga ama erayada qoraalkaas ku jira korloo akhriyo ama uu niyada ka akhriyaa (qalbiga ka akhriyo). Shuruuda caadiga ah ee meesha taallaana waa in erayadu ay xoogaa noqdaan kuwo la fahmo si loogu magacaabo isbadalka mid akhris ah. Waxaa lagu xisaabtamayaa in ay badan yihiin waxyaalaha iskumarka dhacaya inta lagu jiro isbedelladan eray-akhrinta.

Hal nooc oo loo qeexi karo dyslektikere (kuwa ay ku adag tahay akhriska iyo qoristu) waa in la sheego in ay jiraan arday ay mushkiladi ka haysato eray-akhrintu. In la arko habka ay ardaydu u qorayaan erayada kali- kalida ah ayaa sidaa daraadeed noqonaysa mid muhiim ah. Waxa markaa laga fakarayaa in ay kala kulmi karaan mushkilad qayb

²¹ Høien (1999), Snowling iyo Nation (1997)

ahaan ama qaybo ka mid ah isbedelka eray-akhrinta²². Maadaama dhammaan dadka akhriska bilawga ku ahi - kuwaas oo had iyo goor mushkilado yar-yari ka qabsato marka hore ma fududa in ardayda akhriska iyo qoristu ku adag tahay (dyslektiske elever) iyo dadka akhriska bilawga ku ah lagu kala saaro eray-akhrin bilawga hore. Dhinaca kalena khaladaadka yar-yar ee ardaydu samaysaa waxay calaamad u noqan karaan horumar akhriska iyo qorista ah oo caadi ah. Laakiin tan meesha taallaa waa in ardayda leh dysleksi (adkaanta akhriska iyo qorista) ay mushkiladi ka haysato akhriska iyo qorista inkastoo si isku mid ahna wax loogu dhigo una shaqeeyaan si adag oo la mid ah sida kuwa aanay mushkiladaasi haysan. Ardayda akhriska iyo qoristu ku adag tahay (dyslektiske elever) waxaa had iyo goor lagu gartaa in ay mar danbe la qabsadaan xagga horumarinta-akhriska marka loo eego ardayda kale, in ay u shaqeeyaan si ka gaabis-san kuwa kale iyo khaladaadkooda oo ka badan kuwa kale. Waxaa ku dheeraata dhibaataada ka haysata inay kala saaraan farqiga u dhexeeya dhawaaqa qaar xarfaha kamid ah, waxaa kaloo mushkiladi ka qabsataa inay xasuustaan sida ay isu leeyihiin xarfaha iyo dhaqaaqoodu iyo iyadoo mushkiladi ka qabsato in ay xasuustaan in dhawaaqa-xaraf ay ku xidhaan eray. Mushkiladaha dhawaaqa xarfaha waxaa lagu magacaabaa mushkiladaha adkaanta dhawaaqyada luqadeed (fonologiske). Laakiin taa macnaheedu maaha in ardayda leh mushkiladaha adkaanta dhawaaqyada luqadeed (fonologiske) aanay ku dhawaaqi karin hal dhawaaq. Ardaybaa odhan kara 'ayakbaki' halkii uu ka odhan lahaa 'ayakkabi' af-turkiga, ardaygaas oo gaadhsiisan da'da iskuulada. Laakiin ardaygan mushkiladi kama qabsanayso in uu ugu dhawaaqo dhawaaqyada ku jira eraygaas midba sidiisa. Waxaa la rumaysan yahay in ardaygu uu u odhan karo erayga si sax ah kaddib marka cid kale erayga ugu horrayn si deggen oo waadix ah ugu celceliso. Sababta ardayga noocan ahi uu erayga ugu dhawaaqay si khaldan waxay noqon kartaa in ay ku adkaatay fahanka habka uu u dhisan yahay kudhawaaqista eraygani. Ardayda qaar ayaa sidan oo kale ay mushkiladda kahaysata inay ku dhagaan erayada ad-adag oo ay ku celcelin karaani ay ka badan tahay tan haysata ardayda kale xataa haddii ay maqleen erayada dhowr jeer. Mushkiladda ka jirta in la fahmo oo la xasuusto erayada dhaadheer waxaa kaloo u sabab noqon kara in ay ardayga dhib ku tahay (marka loo eego sida caadiga ah) in uu iskumar ku dhago oo qabsado qaybo kamid ah luqadda. Waxaa laga hadlayaa markaa mushkilad (dhib) ka jirta xagga awooda xusuusasho ee luqad-ahaaneed iyo macluumaad (informasjon) kumeel gaadh ah. Hawlo laga soo dheegtay isbedellada adkaanta dhawaaqyada luqadeed (fonologiske) ayaa qofku ka fakirayaa awoodan xusuusasho ee aynu soo sheegnay. Mushkiladaha noocan ah odhaahdeeda cilmiga ah waxaa lagu magacaabaa xusuusashada mushkiladaha shaqo (arbeidsminneproblemer). Waxaa marba marka ka sii danbaysa aad loogu sii fiirsaday in ardayda ay haysato mushkiladda akhriska iyo qoristu ay ku dhibtoon karaan inay kala soo baxaan erayada saxda ah xusuustooda (hukommelsen) iyo in ay si isku xig-xigta u muujiyaan erayadii ay iskood u barten. Noocan ugu danbeeya way adkaan kartaa in la maqlo in ay ardaydu ku dadaalayaan dhawaaqyada-luqadeed si waafaqsan sida ay wax u akhriyayaan ama wax u qarayaan. Waqti ad u gaabis ah ayay ku qaadataa marka ay ka shaqaynayaan akhriska iyo qorista. Qaar ka mid ah ardayda ay mushkiladu ka haysato akhriska iyo qorista waxay dhibi ka qabsataa in ay kalasaaraan oo ay fahmaan dhawaaqyo-luqadeed iyo in ay lasoo baxaan hababka-dhawaaqa ee erayga. Markaa waxaa laga hadlayaa mushkilad lababan-laaban (double deficit)²³.

²² Dabcan waxaa kaloo laga doodayaa noocyo akhriska ah. Wax fara badan ayay noqonaysaa in halkan taa laga guda galo laakiin eeg tusaale ahaan Oftedal (2000) iyo Bøyesen(2002).

²³ Elbro (1990)

Dysleksi (adkaanta akhriska iyo qorista) iyo laba luqadood?

Ma dysleksi (adkaanta akhriska iyo qorista) baa marka arday luqadiisa hooyo aanay ahayn af-noorwiiji ay mushkiladi ka qabsato in uu wax ku akhriyo oo wax ku qoro af-noorwiiji? Jawaabtu inta badan waa: “maya”. Wajiga hore way adag tahay inta badan in wax lagu akhriyo luqad aan erayadeeda la garanayn oo dhawaaqyadeeduna yihiin kuwo aan ahayn kuwa qofku isticmaalo. Akhrinta noocan oo kale ahi waxay durbadiiba noqon kartaa mid kala googo’an. Laakiin mushkiladani waa mid ku dhacda dhammaan dadka xaaladahaas kuwada sugan. Markaa xaaladda luqadda kale ayaa mushkiladda ah. Aqoonta af-noorwiijiga kalmadihiisa, garaamarkiisa (naxwihiisa), dhawaaqiisa-luqadeed iyo kuhadalkiisu waxay u dhawdahay inay caawiso. Sidaa darteed caawimada habka wax-baristu waa in halkan ay noqoto mushkilad kale oo aan ahayn in mushkiladu noqoto dysleksi (adkaanta akhriska iyo qorista). In ardaygu uu muddo wax ku qoro af-noorwiiji iyadoo ay raadaynayso luqadiisa hooyo sida tusaale ahaan ‘borormun’ halkii uu ka qori lahaa ‘broren min’ af-turkiga iyana maaha dysleksi (adkaanta akhriska iyo qorista). Waxaa la xisaabiyaa inay caadi tahay. Laakiin haddii aan habka qoristu marba marka ka danbaysa u sii dhawaan habka qorista ee af-noorwiijiga markaa waxaa imanaysa sabab loo walwalo. Haddii ardaygu uu dysleksi (adkaanta akhriska iyo qorista) ku leeyahay luqadiisa hooyo markaa ardaygaas mushkilad miyay ka qabsanaysa akhriska iyo qorista af-noorwiijigana? Waayo-aragnimada iyo sharraxaadaha tiyoriga (teori) ahiba waxay sheegayaan (ku jawaabayaan): “haa, innta badan”, laakiin dysleksigu (adkaanta akhriska iyo qorista) wuxuu u iman karaa odhaah kale oo af-noorwiiji ahaan ka duwan afka hooyo. Waxay taasina ku xidhan tahay hab-qorista luqada afka hooyo iyo sida ay luqada afka hooyo u samaysan tahay oo la barbar dhigayo af-noorwiijiga. Waxaa kaloo la filayaa inay ku xidhan tahay sida uu ardaygu marba marka ka danbaysa ugu fiican yahay akhriska luqadda afka hooyo. Qayb ka mid ah kartida akhriska ayaa soo wareegi karta. Inta ay leeg tahayna cilmi-baadhayaashu way ka doodaan(doodayaan). Laakiin in badan oo luqadooda koowad tahay af-noorwiiji oo ah ardayda akhriska iyo qoristu ku adag tahay (dyslektiker) ayaa ku xiiqay oo bilawgiiba ku daalay wax akhriska iyo wax qorista sababtuna waxay tahay inay markii hore ku bilaabeen af-ingiriisi oo ah luqad ajnabi ah.

Macquulnimada in dysleksi (adkaanta akhriska iyo qoristu) uu iskasoo muujiyo labada luqadoodba ayaa aasaas u noqon karta in ay caawiso baadhitaanka ardayga ee ku saabsan kartidasa aqooneed ee akhriska ee af-noorwiijiga. Shuruudu waa in ardaydu ay ka yaqaanaan af-noorwiijiga inta ugu yar oo aanay u arag in ay tahay dib u dhac marka baadhitaan lagu samaynayso isna af-noorwiijigooda.

Maxaa larabaa in lagaga ogaado ardayda imtixaannada baadhitaanka?

Waxaa la rabaa in imtixaanada (delprøvene) lagu tijaabiyo in lagu miisaamo in ardaydu yaqaanaan wax la xidhiidha wax-qorista. Afartii imtixaan (delprøvene) ee ugu horreeyay ee fasalka labaad laguma dalbayo in ardaydu ay wax u qorto ama u akhrido si 100% sax ah (si aad u wanaagsan – flytende). Imtixaanadu (delprøvene) waxay cabbirayaan (miisaamayaan) in ardaydu ay dib u gartaan xarafaha iyo inay fahmaan dhawaaqyada erayada. Imtixaanadu (prøvene) waxay si wayn isugu dayayaan nay sharraxaan kartida aqooneed ee adkaanta dhawaaqyada luqadeed (fonologiske). Laylisyada eray-akhrintu waxay cabbirayaan (miisaamayaan) heerka akhriska erayada keli-kelida ah ee ardaydu uu gaadhsiisan yahay.

Yeedhiska xarfahana laguma tijaabinayo in lagu baadho in ardaydu ay alifbeetada korka ka hayaan. Haweenay cilmibaadhis ku samaysay (Geva 2000) ayaa baadhay arday wax akhriska isku mar ku barata laba luqadood. Waxaanay heshay in ardayda alifbeeto hore yaqaanaa ay u muuqato in aqoontoodaasi ay sii gudubto iyadoo aanay

alifbeetada cusub korka ka qaybin. Sidaa daraadeed in aanay garan sida ay isugu xig-xigto alifbeeto cayimani maaha calaamad muujinaysa in ay dhibaato haysato ardayda labada luqadood isticmaala. Laakiin ardayda badidoodu marba marka ka danbaysa way gartaan xarfaha, magacyadooda iyo farqiga u dhaxeeya dhawaaq ahaan. Xarfaha ku jira imtixaanka waxaa loogu talagalay in ardayda lagu siro xarfo u eg xarafka macalinku sheegayo taas oo ah in xarfuhu muuqaal ahaan isu eeg yihiin ama isu dhawaaq eeg yihiin.

Marka la eego dhaqanka barashada akhriska ee noorwiijiga waxaa loo arkaa muhiim in ardayda laga dhigo kuwo yaqaana dhawaaqyada ku xidhiidhsan xarfaha. Waxaanay ku saabsan tahay hab-qoraallada ku dhisan dhawaaqyada sida farta laatiiniga iyo carabiga. Marka ardaydu dhagaysanayaan dhawaaqyada erayada waxaa larabaa inay kala gartaan siday isugu xig-xigaan iyo siday isugu dhex jiraan dhawaaqyadaasi. Marka ardaydu wax akhriyayso waxaa la xisaabiyaa in isku xidhista dhawaaqyada iyo erayadu ay tahay caawimo wayn.

Xidhiidh ayaa ka dhexeeya dhawaaqa xarafka iyo magaca xarafka. Muujinta dhawaaqyadu waxay ugu fudud yihiin xarfaha ay ku dhawaaqistoodu wakhti yara qaadata. Waxay khusaysaa shaqallada oo dhan. Shibanayaasha iyo xarfaha badh ahaani shaqalka yahay sida tusaale ahaan 'j', 'l', 's', 'f', 'm' iyo 'r' iyaguna muujintoodu way fudud yihiin. Af-albaaniga magacyada xarfuhu aad ayay ugu eg yihiin dhawaaqyadooda. Af-turkigana magacyada xarfuhu way ka waadixsan yihiin af-noorwiijiga. Xarfaha 'k', 'l', 'm', 'n' iyo 'r' waxaa layidhaahaa 'ke', 'le', 'me', 'ne', iyo 're', maaha 'kå', 'el', 'em', 'en' iyo 'er'. Haddii ardaygu kaddib marka uu helo waxbarsho bilow ah uu in door ah isku bad-badalo xarfaha dhawaaq ahaan isu eg waxaa taa lagu xidhiidhin karaa in in ardaygu leeyhay mushkilada adkaanta dhawaaqyada luqadeed (fonologiske).

Labada imtixaan (delprøvene) ee ardaydu ay helayaan oo qorayaan xarafka ugu horreeya iyo kan ugu danbeeya ee eray lasiiyay waxaa larabaa in lagu cabiro (miisaamo) waxa lagu magacaabo fikrada adkaanta dhawaaqyada luqadeed (fonologisk bevissthet) ama horumar xaga dhawaaqa ah. Sida ay luqadi u dhisan tahay xaga ku dhawaaqista waxaa lagu garan karaa sida ay ugu sahlanaato ardaydu inay fahmaan dhawaaqa erayada. Af-turkiga shibanuha ugu danbeeyaa higaadintu waa muhiim waayo halka ugu danbaysa ee higaadinta ayaa ah barta xasuusta. Shibanahu halkan wuu isbadali karaa markay ku xidhiidhsan tahay dhamaadka erayga. Taasina waxay noqon kartaa sababta ay carruurta turkigu ugu muuqdaan inay ka fahmi ogyihiin xagga ku-dhawaaqista erayga ugu danbeeya carruurta af-ingiriisiga ku hadasha.

Guud ahaan waxaa la xisaabiyaa in horumarka adkaanta dhawaaqyada luqadeed (fonologiske) uu yahay mid ka bilaabma fahanka halka ugu horraysa, dabadeetana halka ugu danbaysa iyo markaa kadibna dhawaaqyada/xarfaha ee badhtanka hal eray²⁴. Tani waxay go'aamisay sida ay imtixaanadu (delprøvene) isugu xig xigaan. Heerkan adkaantu wuxuu kaloo umuqdaa inuu sax ku yahy sida ay ardaydu u garteen laylisyada. Eray-akhrinta waxaa la keenay eray ugu bilaabmaya uguna dhamaanaya si lamid ah erayga saxa ah. Haddii ay ardaydu erayadan isu eg oo kale isku talaab ku dhigaan (calaamadiyaan) waxaa loo qaadanayaa in ardaydu ay fahmayaan dhawaaqa halka ugu horraysa ee erayga, laakiin laga yaabee in aanay fahmayn halka ugu danbaysa iyo halka ugu dhaxaysa. Imtixaanka baadhitanka ee af-noorwiijiga ah ee ay soo saartay haya'dda Læringssentret (xarunta waxbarista) gaar ahaan (Kartlegging av leseferdighet, 2. klasse, 2000 Baadhitaanka heerka kartida aqooneed ee akhriska ee fasalka 2aad ee sannadka 2000) yeedhisyada erayadu waxay u dhigmaan imtixaanada

²⁴ Ehri (1998)

qorista xarafka ugu horreeya iyo kan ugu danbeeya ee hal eray. Laakiin yeedhiska af-noorwiiijiga ahi guud ahaan wuu kaga sii adag yahay ardayda waayo waxaa la dalbayaa in ardaydu ay erayga oo dhan si sax ah u qoraan si laylisku u noqdo mid sax ah.

Imtixaanada fasalka saddexaad waxaa lagu tijaabinayaa in lagu cabiro(qiyaaso) heerka akhriska qoraallada ee ardaydu uu gaadhsiisan yahay. Fasalka saddexaad waxaa kaloo loogu daray imtixaan lagu cabirayo heerka akhriska iyo fahanka ee erayada keli-kelida ah ee ardaydu uu gaadhsiisan yahay. Waa layliska erayada xidhiidhsan.

Heerkeebuu gaadhsiisan yahay hubinta imtixaanada iyo xuduudaha ee ardayda laba-luqadlayd ah? (sikre grenser)

Dhamaan inta isticmaalysa imtixaanadani waa in ay ogaadaan in uu kani yahay mid talo-bixin ah ee aanu ahayn wax la xaddiday oo ku dhisan xulid meel ku jihaysan. Waa marka hore ee ardayda si nasiib ah loolama soo bixin. Waa lasoo dooray hadba sidii ay u suuro gashay. Suuragal ma aha in la xaqiijiyo in ardaydani ay matalaan dhammaan ardayda laba-luqadlayda ah ee wax ku barta shantii luqadood ee aynu soo sheegnay. Waa ta labaade dhinaca kalena arday aad u yar ayaa ka qayb qaadanaysa baadhitaanka. Taasi waxay khusaysaa ardayda af-soomaaliga ku hadasha gaar ahaan fasalka saddexaad. Waa ta saddexaade waxay su'aali ka taagan tahay in imtixaanadu ay koobayaan wixii loogu tala galay. Waxay khusaysaa kartida aqooneed ee akhriska iyo ardayda ay mushkiladuhu haystaan. Maadaama haddaba ay imtixaannadu ku dhisan yihiin imtixaanadii af-noorwiiijiga ayaa waxay u muuqataa in ay in badan cabirayaan (qiyaasayaan/miisaamayaan) kartida aqooneed ee akhriska. Macallimiinta laba-luqadlayda ah iyaguna waxay sheegeen sida ay la tahay in ay ardaydu wax u akhriyaan, natiijadii ay sheegeenna waxay noqotay mid sax ah. Tan adagise waa in la xuso in imtixaanadu ay soo saarayaan ardayda ay mushkiladuhu haystaan.

Xuduudahana waxaa loo dhigay si ku meelgaadh ahaan ah. Waxaana lagu baadhayaa in dhammaan ardayda ka qayb galaysa imtixaamistu ee ay u muuqato in uu walwal ka jiro aad loosii baadho. Qiimaynta macallimiinta laba-luqadlayda ah, qiimaynta iskuulka/dugsiga, hawlgaladdii kalee suuragal ah iyo wixii walwal ahee ay qabaan waalidiintu intaba waxaa labarbar dhigayaa natiijooyinka ardayda ee imtixaanada baadhitaanka ee afka-hooyo iyo haddii ay suuragal noqoto af-noorwiiijigaba.

Kuwani waa ardayda laba-luqadlayda ah oo markaa waa muhiim in la ogaado sida ay ardaydu u akhriyayaan iyo sida ay u gaadhayaan darajada ee waliba af-noorwiiijigana. Xaaladaha qaar ayaa ardaydu gaadhaan darajooyin imtixaanada af-noorwiiijiga ah ee ka sarreeya xuduudaha halista²⁵ ah ee halkaa yaalla. Markaa ma jirayso sabab looga walwalo in ardadu ay caadiyan leeyihiin mushkilado xagga akhriska iyo qorista ah. Laakiin ardayda qaar darajo-gaadhistooda imtixaannada baadhitanka ee labada luqadoodba way hoosaysaa. Ardayda qaarna waxay soo gaadheen meel hoose oo aan lagu talinayn inay galaan imtixanka af-noorwiiijiga ah. Waa la qaaday imtixaanada afka hooyo, qaar ardaydan kamid ahina darajooyinka ay ka gaadheen imtixaanada afka hooyo way hooseeyaan. Labadan kooxood ee ugu danbeeya ee ah ardayda darajooyinkoodu ay hoosayso waxaa lala xidhiidhay iskuuladooda/ dugsiadooda. Darajooyinka hooseeya macnaheedu waa isbedel ah hal ama wax kabadan oo kamid ah imtixaanada (delprøvene) afka hooyo. Waxay u muuqataa inay si fiican isu

²⁵ Waxay ku taallaa xuduudaha 'halista' ahee imtixaanada baadhitaanka. Laakiin Liv Engen oo iyadu mas'uuliyad wayn ka haysay imtixaanada baadhitaanka ee af-noorwiiijiga ee fasallada bilawga ah ayaa iyaduna xuduudaha ku magacawday xuduudaha walwalka leh. Sababtu waa in erayga halis ('kritisk') uu u muuqdo mid khatar ah. Erayga 'walwal / bekymring' wuxuu sheegayaa inuu qofku noqdo qof diyaar ah oo wax la socda.

waafaqsanyihiin walwarka iskuulka/dugsiga iyo macalimiinta iyo kan isbedelka ee imtixaanada. Tan aan ku jirini waa isbedelka qudha ee imtixaanada kelikelida ah ee arday tiro yar.

Ardayda qaar darajooyinka af-noorwiiigiga waxay noqon karaan kuwo ka hooseeya kuwa afka hooyo marka loo eego xuduudaha loo dhigay. Markaa iskuulka/dugsiga ayaa u malaynaya in horumarka luqada ee af-noorwiiigiga uu yahay kan adag ee u baahan dadaalka dheeraadka ah ee aanay ahayn akhriska iyo qorista. Ardayda qaar ayaa lagu baadhay (tijaabiyay) imtixaanno kale. Waxaana loogu tala galay si loo caddeeyo in ay jirto sabab loo walwala. Illaa hadda waxay u muuqataa inay si fiican isu waafaqsan yihiin oo imtixaanadana lagu isticmaali karo si loo ogaado ardayda walwarka leh iyadoo lagu eegayso xuduudaha loo dhigay. Shuruuddu waa xaqiiqdii in macalinku uu raaco talooyinka iyo tilmaamaha.

Goorma ayaa sabab loo walwalo oo akhriska ahi ka jirtaa arday cayiman?

Heerkeebay dhab ahaan gaadhsiisan yihiin xuduudaha hoose? Ma in ardaygu uu gaadhsiisnaadaabaa xuduuda hoose meel ka hoosaysa ee mid ama imtixaanno badan oo afka hooyo ah kahor intaan laga hadlin?

Jawaabtu waxay tahay mid ku xidhan imtixaanku kuu yahay iyo sida ardaygu u gaadhayo darajada. Ardayda qaar ayaa ah qaar la qalin daaray ama si khaldan u fahmay laylisyada, laakiin ah kuwo inta kale ugaran lahaa si lagu qanci karo. Waxaa kaloo dhici karta in ardaydu ay daalaan kama dambaysta oo ay markaa si aan fiicnayn uga shaqeeyaan imtixaanka (delprøven) ugu danbeeya. Inta laylisyada tijaabada ah aan laguda gelin waxaa jira arday badan oo iyana larumaysan yahay in ay si khaldan u xisaabiyeen wakhtiga layliska iskuxidhka. Ardayad ka mid ah ardayda ka qayb qaadatay imtixaamista ayaa sida la rumaysan yahay si khaldan u fahantay imtixaanka (delprøve) 4aad waxaanay iyadu qabtaa in aan iskuulku/dugsigu walwalsanayn. Ardayda natiijooyinkooda imtixaano badani (flere delprøver) ay gaadhsiisan yihiin meel ka hoosaysa xuduuda loo dhigay waxaa la rumayn karaa in ardayga mushkiladi haysato. Haddii loo malaynayo in mushkiladaha xidhiidh ka dhexeeyo, tusaale ahaan nooca dhawaaq-luqadeed ee isbedbedela waxaa la rumayn karaa in la ogaado mushkilad (dhibaato jirta). In natiijooyinka ardayda ee hal imtixaan oo keli ah la qiimeeyaana maaha mid habboon. Mahabboona iyana in laga fasirto (in laga xukumo heerka uu gaadhsiisan yahay ardaygu) natiijooyinka ardayda ee hal imtixaan oo keli ah. Imtixaanka halkan ugu khatarsani waa imtixaanka (delprøve) 3aad. Waana ka ka kooban iskuxidhista xarfaha waaweyn iyo kuwa yaryar ama xaraf keli u taagan oo lasocda xarfka ugu horreeya ee erayga. Kani aad uguma xidhiidhsana imtixaanada kale. Ardayda laga walwalsanyahay waxay halkan gaadhi karaan (heli karaan) darajooyin sar-sare iyo kuwo hoos-hooseba. Imtixaanada kale iyaga waxaa ka dhexeeya xidhiidh wayn. Laakiin waa in guud ahaan laga taxadaraa in loo fasirto natiijooyinku inay yihiin kuwo kama dambays ah. Sababtuna waa in xuduudaha loo dhigay si tilmaamis ahaan ah oo aan ahayn imtixaanno iskuwada heer ah.

Natiijadda ardayga imtixannada ukuur gelidda ee af-soorwiiigiga ahi waxay xaawin karaan turjumaadda (fasiraada) (norsk hjelpe til)

Maadaama ardaydu yihiin laba luqadod-lay waa in macalimiintu kawada shaqeeyaan qiimaynta natiijooyinka ardayga ee akhrinta af-noorwiiigiga iyo luqada afka hooyaba. Erayada tirada yar ee uu ardaygu ku yaqaano afkiisa hooyo ayaa keeni karta in ardayga uu imtixaanka afka hooyo ku adkaado iyada oo aan laga hadal mushkilado gaar ah. Si kastaba ha ahaatee maaha in macalimiintu ay imtixaanada ukuurgelidda ee af-noorwiiigiga ah oo qudha ugu qaataan farsamo ahaan (ku eegaan) ardayda laba

luqadlayda ah. Haddii ardaydu yihiin kuwo imika uun dalka yimi ama sababo kale dartood uu u yaraaday horumarkooda xagga af-noorwiijigu markaa farsamada ukuurgelidaasi waxay ardayda u keenaysaa uun niyadjab iyada oo aanu qofku wax badan ka ogaan kartidooda aqooneed ee akhriska. Laakiin ardayda qaarbaa af-noorwiijigana wax ku akhriyi kara. Marka ay bartaan in ay luqadooda hooyo wax ku akhriyaan waxay kartidooda aqooneed ee akhrintu u gudbi kartaa inay af-noorwiijigana akhriyaan. Qaarbaa labada luqadoodba si isbarbar socota loogu dhigi karaa fasalka 2aad. Ardayda laba luqadod-layda ah ee fasalka 3aad badidoodu waxay kaloo dhigteen waxbarasho akhriska ah oo af-noorwiiji ah. Markaa way habboon tahay in af-noorwiiigana loogu kuurgalo(lagu baadho) kartidiisa aqooneed ee akhriska Haddii aanu ardaygu wax saamayn ah ku lahayn imtixaanada u kuurgelista(baadhistu) ee af-noorwiijiga ah ee uu ku leeyahay oo qudha kuwa afkiisa hooyo markaa sida aan hore u magacawnayba ma jirto wax sabab ah oo lagu aamino in ardaygu leeyahay dysleksi (adkaanta akhriska iyo qorista) ama mushkilad khaas ah oo xagga akhriska iyo qorista ah. Si toos ah la isuma barbar dhigi karo darajooyinka uu ardaygu ka gaadho imtixaanada af-noorwiijiga ah iyo kuwa afka hooyo. Xaqiiqdii imtixaanada isku qaab(hab) ayaa loo sameeyay, laakiin ardayda laba luqadlayda ah darajooyinkooda celceliska ah iyo xuduudahooduba way hooseeyaan. Taas sababteeduna waxay noqon kartaa in ardayda laba luqadlayda ahi ay heleen kutababarasho yar oo xagga luqadda ah. Sidoo kalena ardayda af-noorwiijiga ku hadasha erayada ku jira imtixaanada afka hooyo way kaga adkaan karaan erayada af-noorwiijiga ah. Farta(hab-qoraalka) iyo luqadaha waxaa la xisaabiyaa in ay dadka qaar aad ugu adag yihiin marka loo eego qaar kale. Markaa waxa la sugaa waa in ardaydu aanay meel dheer gaadhayn. Lamana hayo wax garantii ah in ay ardayda imtixaanada ku gashay af-noorwiiji ay lamid yihiin kuwa kugalay afkooda hooyo. Dhinaca kalena waxaa loo arkaa in kuwa ka qayb galay imtixaamistu yihiin kuwo aad xarfaan u ah. Sababtuna waxay noqon kartaa in ay laba luqadood isticmaalaan oo ay markaa kartidaooda aqooneed ee adkaanta dhawaaqyada luqadeed (fonologiske) ee hal luqad u gudbiyaan ta kale. Lakiin way jiri karaan arday badan oo laba-luqadlay ah oo intani dhibaato ku tahay marka la barbar dhigo inta imtixaamada af-noorwiijiga ah. Waxaanay tani kusii xidhiidh sanaan kartaa qofka uu yahay kan loosoo xulay inuu helo waxbarasho akhriska ah oo luqadiisa koowad ah. Waana mid laga rabo in xaalada ay ku sugan yihiin ardaydu ee ah in luqad ahaan laga tiro badan yahay, tirada xiisadaha ee ardaydu ay waxbarasho akhriska iyo qorista ah u helaan, nooca waxbarasho ee ay helaan iyo heerka ay suura gal tahay in waalidku ay ka tageeri karaan oo ka caawin karaan waxbarashada akhriska iyo qorista, intuba waa kuwo wax ka sheegaya sida ardaydu wax u akhriyayaan.

Doodda imtixaanka baadhitaanka ee fasalka 2aad

Imtixaanka (Delprøve) 1aad – Yeedhiska xarafka

In la eego in ardaydu ay dib u gartaan, arkaan oo maqlaan farqiga u dhexeeya xarfaha

Kani wuxuu u muuqdaa inuu yahay imtixaan (delprøve) soo saaraya ardayda mushkiladuhu haystaan. Waxaa laga arkaa natiijooyinka kumeel gaadhka ah in imtixaanku u muuqdo in uu u fudud yahay ardayda badidooda dhammaan luqadaha oo dhan. Qiyaastii 17% ardayda faslka labaad way garteen laylisyada. Darajada celceliska ahi waa 16 iyo 17 xaraf. Marka ugu horraysa way jiri kartaa sabab loo walwala haddii ardaygu uu wax badan isku khaldo wax badanna khaldo layliskan(deloppgiven). Waxay kaloo u muuqataa in uu jiri karto sabab loo walwalo haddii ardaygu uu siyaalo kala duwan ugu dhawaaqo xarfaha.

Laakiin waa muhiim in la qiimeeyo nooca ay yihiin waxyaalaha uu isku khalday. Haddii uu macallinku isticmaalo dhawaaqa xarafka meeshii uu ka isticmaali lahaa magaca xarafka marka uu yeedhinayo markaa si fudud ayay ardaydu isugu khal-khaldi karaan xarfaha dhawaaqaas leh. Markaa af-fiyadnaamiga waxay ardaydu isku khal-khaldi karaan ‘x’ iyo ‘s’, ‘d’ iyo ‘gi’, ‘c’ iyo ‘k’, ‘i’ iyo ‘y’. Isku khal-khaladkani waa calaamad muujinaysa in ardaygu uu dhagaysanayo dhawaaqa xarafka, mana aha markaa in uu walwal ka jiro horumarka wax akhriska ee ardayga.

Xarfaha ay aad u fududahay in la isku khaldo

Arday badan oo isku luqad ah ayay xarfaha qaar u fududahay in la isku khaldo. Af-urduuga waxay khusaysaa xarfahan ک (kaf) iyo ق (qaf). Illaa kalabadh ardayda bartay inay akhriyaan af-urduugu way isku khal-khaldeen labadan xaraf. Waxaa la rumaysan yahay in sababtu tahay in labadan xaraf aad isugu dhawaaq eeg yihiin. Si isku mida ayay u samaysmaan, halka lagaga dhawaaqayo ee afka dhexdiisuna aad ayay isugu dhaw yihiin. Afar meeloodoow meel kamid ah ardayda af-urduuga bartay ayaa iyana isku khalday گ (gaf) iyo ک (kaf). Tanna waxaa la rumaysan yahay inay sababteedu tahay in ay xarfahani muuqaal ahaan isu egyihiin laakiin aanu dhawaaqoodu aad isugu eekayn. Sida kale se 2% kamid ah ardayda fasalka 2aad ee wax ku akhriya luqadahii aynu soo sheegnay ayaa yeedhiska xarfaha isku khalday xarfaha ‘g’ iyo ‘k’. Laba kamid ah xarfaha dhawaaqyada ‘z’, ز (zoe) iyo ض (zoad) iyana arday badan ayaa af-urduuga isku khaladay iyadoo aanay tani calaamad u ahayn mushkilad adkaanta dhawaaqyada luqadeed (fonologiske) ah. Lakiin waxay u muuqataa in sababta ugu wayn ee isku khal-khalad kaasi tahay isu ekaanta xarfaha ee aanay ahayn dhawaaqyada xarfaha. Waayo hal arday oo qudha ayaa isku khalday ض (zoad) iyo ز (ze) af-urduuga.

13% oo ka mid ah ardayda helay waxbarasho akhris ah oo af-soomaali ah ayaa iyana isku khalday ‘k’ iyo ‘q’. Kuwani waa xarfo dhawaaqoodu u dhigmo kuwa urduuga ²⁶. Inay kala gartaan farqiga u dhexeeya shaqalka gaaban iyo ka dheer ayaa ah mid ku adag arday badan oo da’doodu tahay 8 jir luqaday doontaba ha ahaatee. Sidanoo kale ayay u muuqataa inay yihiin ardayda iyana wax ku akhriya af-soomaaligu. In ka badan inta ay mushkiladuhu haystaan ayaa isku khalda ‘a’ iyo ‘aa’, iyo ‘i’ iyo ‘ii’. 13% ardayda afsoomaaliga akhridaa waxay kaloo isku haldeen ‘q’ iyo ‘kh’. Xarfaha dhawaaqyadani waxay ku samaysmaan isku meel (afka gudihiisa), laakiin ‘kh’-du way ka yar culustahay/jiidantaa (lages med mer friksjon). 13% kamid ah ardayda af-soomaaliga akhrida waxay isku khaldeen oo kale ‘kh’ iyo ‘x’. Labadan dhawaaq isku si ayay u samaysmaan laakiin laba meelood oo yar kala duwan ayay ka samaysmaan (afka gudihiisa). Isku khaladkani ma keenayo sabab loo walwalo.

Sidoo kale uma aha suura gal ardayda reer Kosofo inay kala gartaan dhawaaqa ‘gi’ iyo ‘xh’. Xarfahan waxaa isku khalday 40% oo ardayda ka mid ah. Ma foga jaaniska lagu khaladi karo marka la maleeyo labada xaraf ka saxda ah.

Ardayda leh wax barasho akhris ah oo af-turki ah waxay u muuqdaan in shan meeloodoow meel (22%) ay ku adag tahay inay kala saaraan farqiga u dhexeeya ‘ç’ iyo ‘c’. Ardayda sidooda kale u muuqda inay si fiican wax u gartaan iyaga laftoodu way isku khaldeen xarfahan. Farqiga u dhexeeya dhawaaqyadani waa in ‘ç’-du ay tahay mid cod ahaan loo muujiyo ‘c’-duna ay tahay mi aan cod ahaan loo muujin. Ardayda af-fiyadnaamiga akhrida waxay u muuqan kartaa in shaqallada ‘â’ iyo ‘ä’ ay yihiin kuwo si fudud la isugu khaldi karo iyadoo aanay jirir sabab loo walwala. 16% oo kamid ah ardayda af-fiyadnaamiga akhrida way isku khaldeen kuwaas. ‘gi’

²⁶ iyo af-carabiga. Tilmaamista akhriska ee A.M. Hauges leseverk waa isbarbardhig ka kooban af-noorwiiiga, shantii luqadood ee baadhitaanku ku socday iyo afcarabigaba..

iyo ‘d’ dhawaaqoodu wuu isku dhow yahay sidaa daraadeedna 19% oo kamid ah ardayda af-fiyadnaamiga akhridaa way isku khaldeen labadan.

Saamynta af-noorwiiijiga?

Waxa ay wadaagaan ardayda akhrida af-albaaniga, af-soomaaliga, af-turkiga iyo af-fiyadnaamigu in 18% iyaga ka mid ahi ay isku talaab ku dhigeen (calaamadiyeen) xarafka ‘o’ marka macalinku sheego magaca xarafka ‘u’ luqadooda afka-hooyo. Waxaa la rumaysan yahay inay tani tahay saamayn ka timi af-noorwiiijiga. Af-soomaaliga waxay kaloo saamaysay in ardaygu qoro ‘j’ meeshii uu ka qori lahaa ‘y’. Sidoo kale qiyaastii saddex daloolow hal dalool oo kamid ah ardayda af-albaaniga akhridaa waxay qoreen ‘u’ meeshii ay ka qori lahaayeen ‘y’ af-albaaniga. Dhawaaqa xarafka af-albaaniga ah ee ‘y’ wuxuu u eeg yahay kan af-faransiiska ee ‘u’. Wuxuu ka samaysmaa xagga danbe ee carrabka, waxaanu dhawaaqaasi yahay mid u dhigma meel u dhaxaysa dhawaaqyada xarfaha af-noorwiiijiga ee ‘u’ iyo ‘y’. Sidoo kale 17% oo kamid ah ardayda af-turkiga akhridaa waxay isku-talaab ku dhigeen (calaamadiyeen) ‘u’ iyagoo u jeeda ‘ü’. 11% oo kamid ah ardayda af-fiyadnaamiga akhridaa waxay isku tallaab ku dhigeen (calaamadiyeen) ‘d’ iyagoo u jeeda ‘đ’.

Arday tiro yar oo ah kuwa ay u muuqato inaan laga walwal sanayn ayaa ka tagay xarfaha waqtiyada naadirka ah la isticmaalo nidaamka-qoraalka. Waxay ku saabsan tahay ‘j’ ee af-turkiga iyo xarafka dhawaaq ahaan u dhigma ee af-urduuga oo ah ج.

Isku khalad ay sameeyaan oo qudha ardayda mushkiladaha adkaanta dhawaaqyada luqadeed (fonologiske)?

Maaha caadi in la helo farqi wayn oo ku jira khalad-eegista ardayda mushkiladaha leh iyo kuwa aan mushkiladaha lahayn. Illaa hadda waxay u muuqataa in ardayda laga walwalsan yahay ee imtixaamistani ay iyana isku khaldaan wixii isku khalad-koodu uu fudud yahay, laakiin waxaa taa u dheer inay leeyihiin isku khal-khal did kale. Isku khal-khal didaasina waa kuwo kala duduwan. Laakiin isku khal dista shibana-yaasha lammaanaha ah ee loogu dhawaaqo cod ahaan iyo kuwa aan loogu dhawaaqin cod ahaan ee ‘k’ iyo ‘g’, ‘f’ iyo ‘v’, ‘b’ iyo ‘p’ waxaa sameeya oo qudha boqolkiiba hal ama laba kamid ah ardayda fartoodu laatiiniga tahay. 85 - 100% oo kuwaas ka mid ahi waxay u muuqataa in walwal ka jiro. Tani waxay noqon kartaa caalamad muujinaysa mushkilad. Laakiin guud ahaan lama odhan karo ardayda laga walwalsan yahay oo qudha ayay mushkiladi ka haysataa kala saarista shibanaha loogu dhawaaqo cod ahaan iyo kan aan loogu dhawaaqin cod ahaan. Sida aan kor kusoo sheegnayba way ku adkaan kartaa ardayda akhrida af-turkiga ee fasalka labaad inay kala saraan shibanaha loogu dhawaaqo cod ahaan iyo ka aan loogu dhawaaqin cod ahaan: ‘ç’ iyo ‘c’, iyadoo aanay tani keenayn sabab loo walwalo.

Imtxaanka (Delprøve) 2aad – Qorista xarafka ugu horreeya ee hal eray

Kani waaimtixaan(delprøve) u muuqda inuu u fudud yahay sida kii aynu soo dhaafnay. Qiyaastii 17% kamid ah ardayda oo dhan ayaa gartay laylisyada halkan oo dhan. Qiimayaasha celcelisku waxay gaadhsiisan yihiin inta u dhaxaysa 8 iyo 10 xaraf oo sax ah. Marka ugu horraysa waxaa taalla sabab loo walwalo haddii ardaygu uu imtixaankanna khalad badan sameeyo. Sidoo kale waxaa muhiim ah in la eego (ogaado) kuwa ay yihiin xarfaha uu isku khal-khal day imtixaankan (delprøven).

Isku khal did xarfo dhawaaqoodu isku mid yahay

Isku khal dida qaar ayaan macno lahayn markaynu ka hadlayno mushkilado akhriska iyo qoraalka ah. Waxay ku saabsan tahay gaar ahaan xarfaha dhawaaqoodu isku midka yahay. Marka ardaydu ay khaladaad noocan oo kale ah sameeyaan bilawgooda wax-qorista waxay taasi muujinaysaa in ardaydaasi ay meel iska fiican soo gaadheen. Taa macneheedu wuxuu noqon karaa in ay maqleen oo fahmeen dhawaaqa saxda ah.

Af-urduuga waxaa 12 % ka mid ah fasalka labaad ay qoreen xarafka ث (se) meeshii ay ka qori lahaayeen س (sin) ee erayga ساپكل (saikl). Eraygan macnihiisu af-noorwiiijiga waa 'sykkel'. Ardaydu waxay markaa isticmaaleen dhawaaqa 's' ee ugu caadi-san lakiin sababtu waxay noqon kartaa in ث (se) ay ku jirto halka ugu horraysa ee alifbeetada af-urduuga. Waxay noqon kartaa xarafka ardaydu ay ugu horraynba ka fakirayaan.

Af-albaaniga waxaa 7% kamid ah ardaydu qortay 'gj' meeshii ay ka qori lahaayeen 'xh' erayga 'xhep'. Sida horeba loo magacaabay waa in ardaydu ogaato in ay tahay 'xh' ee aanay ahayn 'gh'.

Af-fiyadnaamiga xarfo kasii badan ayaa leh dhawaaq isku mid ah. 25% ka mid ah ardaydu waxay qoreen 'k' meeshii ay ka qori lahaayeen 'c' erayga 'cây' iyo 'ca', 8% ayaa qoray 'r' meeshii ay ka qori lahaayeen 'gh' erayga 'ghê' (stol), 5% ayaa qoray 'x' meeshii ay ka qori lahaayeen 's' erayga 'sûra' (melk) iyo 3% oo qoray 'gi' halkii 'd' erayga dao. Wixii kale eeg Husby (1991) si loo helo muuqaal guud oo ah xarfaha af-fiyadnaamiga wadaaga hal dhawaaq.

Noocyo khalad ah oo ay wadaagaan imtixaanada(delprøve) 1aad iyo imtixaanada (delprøve) 2aad?

Sida kale se waxay u muuqataa in xarfaha ardayda qaar ku adag qaybta yeedhiska xarfahu ay ku adkayd imtixaan kanna. Qiyaastii afar dalooloow dalool kamid ah ardayda af-urduuga akhridaa waxay isku khaldeen xarfaha ک (kaf) iyo ق (qaf) ee erayga 'kursi' (stol). Sida lagu xusay dooddii imtixaanka xagga sare ku xusanba waxaa larumaysan yahay in sababtu tahay in labadan xaraf dhawaaqoodu ay u samaysmaan si isku mid ah meel isku mid ah (afka gudihiisa). Isku khal-khaladkaas waxaa sameeyay in aad uga badan inta u muuqata in mushkilado haystaan.

Dhawaaqa 'xh' wuu ku adkaaday 17% kamid ah ardayda af-albaaniga ku hadasha taas oo ah mid ka badan kuwa darajadoodu hoosayso imtixankan (delprøven). Ardayda ku hadasha af-turkigu dhawaaqa 'ç' wuxuu ku adkaaday 19%. Ta ugu adagina waxay ahayd in xarfakaas lagu badalo 'c' ama lagu dhawaaqi karo. Sidakale se waa u caadi ardayda af-turkiga ku hadashaa inay qoraan 'u'.

Ardayda qaadatay waxbarasho akhriska ah oo af-fiyadnaamiga ah wuxuu imtixaankani (delprøven) muujiyay inay iyana mushkiladi ka haysato inay kala saaran 'd' iyo 'đ'. 12% oo kamid ah ardaydu waxay qoreen 'd' halkii ay ka qori lahaayeen 'đ' erayga 'đen', (lampe) halka 2% kamid ah ardaydu ay isugu khaldayaan dhinaca kale (yacni 'd' iyo 'đ'). Waxay qorayeen 'đ' halkii 'd' erayga 'dao' (kniv). Isku khaladka labadan xaraf waxay muujinaysaa sidaan kor kusoo sheegnayba saamayn ka timi af-noorwiiijiga.

Xarfo khaas ah iyo dhawaaqyo

Ardayda af-soomaaliga ku hadasha ta ugu adagi waxay noqotay in ay qoraan xarafka ugu horreeya ee erayga 'calan'. 'C'-du kumay jirin yeedhiska xarfaha. 33% ayaan garanin. Ardaydan badankoodu waxay badalkii 'C' -da qoreen xarafka 'a ama aa'. Waxay muujinaysaa inaanay maqlin halka (afka) dhawaaqa xarafka 'c'-du kasoo baxo oo ah xagga danbe ee hunguriga. Qaar kamid ah ardayda af-soomaaliga ku hadasha ayaa qoray 'q' halkii ay ka qori lahaayeen 'c'. Waa malayn wanaagsan waayo dhawaaqa xarfakaas isna wuxuu ka soo baxaa meel danbe oo afka ah. Sida kale se xarafka 'q' ee erayga 'qalin'(blyant) wuu ku adkaaday arday badan oo ah kuwa af-soomaaliga ku hadla kuwaas oo guud ahaan kabadan kuwa darajadoodu hoosayso. 26% ayaa ku dhawaaqay xarfaan ama wax kale qoray.

Imtixaanka (Delprøve) 3aad – Isku xidhista xarfaha waawayn iyo kuwa yaryar ama in xarfaha u samysan qaab xidhan in lagu xidho xarfaha ugu horreeya eray

Sida hore loo xusayba imtixaankani (delprøven) waa ka sida ugu yar u waafaqsan imtixaanada kale. Sidaa daraadeed waxaa lagu xisaabtamayaa in uu soo saarayo wax kale.

